

Warsidaha Daaweynta COVID-19



Diseembar 22

[Akhristayaasha ku soo dhawaada](#)

[Warbixinada Daaweynta COVID-19](#)

[Xogta qoondaynta](#)

[Dhacdooyinka](#)

[Khayraadka/Ilaha](#)

Akhristayaasha ku soo dhawaada

Ku soo dhawoow warsidaha Daaweynta ee Maamulka Caafimaadka Oregon (Oregon Health Authority, OHA) ee COVID-19!

Ujeedada warsidahani waa in kooxdeena ay ku sii xirnaato Oregon. Waxaan higsaneynaa inaan kula socodsiiyo dhammaan waxyaabaha daawaynta, dhacdooyinka, iyo inaan ku siino kheyraad dheeraad ah ee COVID-19. OHA waxaa ka go'an sinnaanta

iyo kordhinta helitaanka daawaynta COVID-19 ee loogu talagalay dadka rer Oregon ee u baahan.

Warbixinada daaweynta COVID-19

Tijaabada lagu Daaweeyo (Test to Treat, T2T)

Barnaamijka **Tijaabada lagu Daaweeyo (Test to Treat, T2T)** waxay ku xirtaa dadka u qalma ee khatarta sare ugu jira COVID-19, in la daaweeyo. Goobahan ayaa dadka siiya helitaanka si loo baaro, ka helaan warqad rijeetada ee dhakhtarku bixiyaha, oo ay ku buuxiyaan rijeetadaas, dhammaan hal meel ama rijeetada daawadaada laguu soo diro farmashi kuu dhow. [Meeleeyaha Isbaar si laguu Daweeyo \(Test to Treat, T2T\) waxa uu gacan kaa siinaaya inaad hesho](#) meelo bixiya adeegyadan. **Maskaxda ku hay, qaar badan oo ka mid ah goobaha, oo ay ka mid yihiin qaar ka mid ah Xarumaha Caafimaadka ee Dowlada dhexe (Federally Qualified Health Centers, FQHCs), waxay leeyihiin awood caafimaadka fogaan araga ah. Tusaale ahaan, goobaha Walgreens ee ku taxan goobeeyaha waxay leeyihiin awooda caafimaadka fogaan araga ah iyada oo loo marayo Providence Express Care.**

Haddii aad caymis la'aan tahay, aad dhibaato ku qabto bixinta kharashka daryeelka caafimaadka, ama aad u baahan tahay dhigaalo dheeraad ah, FQHC-yada u taxan sida Tijaabada lagu daaweeyo waa ikhtiyaaro waaweyn.

Walgreens marka laga soo tago, fadlan eeg liiska hoose si aad u hesho gooba badan oo Tijaabada lagu Daaweeyo.

FQHC-yada

- [Virginia Garcia Memorial Health Center - Hillsboro](#)
- [One Community Health - Hood River](#)
- [One Community Health - The Dalles](#)
- [Valley Family Health Care - Ontario](#)
- [Valley Family Health Care - Nyssa](#)
- [Valley Family Health Care - Vale](#)
- [Central City Concern Blackburn Center - Portland](#)
- [Central City Concern Old Town Clinic - Portland](#)
- [La Clinica - Medford](#)

Daryeelka Degdegga ah

- [St. Charles Urgent Care - Prineville](#)
- [St. Charles Urgent Care - Bend](#)
- [St. Charles Urgent Care – La Pine](#)
- [AFC Urgent Care - Hillsboro](#)
- [AFC Urgent Care - Northwest Portland](#)
- [AFC Urgent Care - Beaverton](#)
- [AFC Urgent Care - Northeast Portland](#)
- [AFC Urgent Care - Oregon City](#)
- [AFC Urgent Care Telemedicine](#)
- [Go Health - Cedar Hills](#)
- [Go Health - Fairview](#)
- [Go Health - Gresham](#)
- [Go Health - Johnson Creek](#)
- [Go Health - Lake Oswego](#)
- [Go Health - Oregon City](#)
- [Go Health - Raleigh Hills](#)
- [Go Health - Sherwood](#)
- [Go Health - Williams](#)

Farmashiyayaasha

- [Prescriptive Pharmacy - Redmond](#)

OGSONOOW: Fadlan dib u cusboonaysii goobta soo hel inta u dhaxaysa raadin kasta



Caafimaadka Fogaan-arag

Laga helay COVID-19?

Maamulka Caafimaadka ee Oregon waxay la kaashadeen Color Health si ay u bixiyaan booqashooyin caafimaad taleefan ahaan ah (telehealth) oo **lacag la'aan ah** gudaha Oregon si loo go'aamiyo in daawaynta COVID-19 ay kugu habboon tahay iyo in kale.

Kahor inta aadan wicin ama booqan websaydka Color fadlan tixgeli waxa soo socda:

- Daawooyinka waxaa laga yaabaa inaysan ku habbooneyn qof walba. Xaaladaha qaarkood, bixiye caafimaad ayaa laga yaabaa inuu u baahdo inuu sameeyo shaybaar si si amaan ah laguugu qoro daaweyn. Sababtaa darta, waxaan qof walba ku dhiirigelinaynaa inaad wacdo ama booqato bixiyahaga daryeelka caafimaad marka hore haddii ay kugu soo kordhaan astaamaha ama aad bositif ku noqoto baaritaan.
- Color health waxay bixisaa ballamo caafimaad taleefan ahaan ah (telehealth) oo lacag la'aan ah si loo go'aamiyo haddii aad u qalanto daaweynta ka-hortaga fayrayska (antiviral) afka laga qaato ee COVID-19. La-talinta waxaa lagu bixiyaa **17 luqadood oo kala duwan.**

Haddii daaweynta uu qoro dhakhtar inta lagu jiro booqashada caafimaadka taleefan ahaanta ah (telehealth), waxaad dooran kartaa in daawada lagu qoray laguugu keeno 24 – 48 saacadood gudahood ama aad heli karto inaad ka qaadato farmashiyo maxali ah.

Saacadaha caafimaadka fogaan-araga waa **8:00 subaxnimo ilaa 8:00 galabnimo PST**, 7 maalmood ee isbuuca.

Si aad u bilowdo booqashada bilaashka ah, isticmaal taleefankaaga casriga ah ama kombiyuutarka si aad u booqato:

color.com/covid-19-treatment-or

Ama ku iskaan-garey koodka QR-ka kaamarada taleefankaaga casriga ah.



Haddii aadan haysan taleefan casri ah ama aadan heli Karin kombiyuutar, waxaad wici kartaa khadka taleefanka oo sidoo kale waxaad wici kartaa khadka taleefanka ah 833-273-6330.

Sida ay u shaqeyso?

Tallaabada 1-aad

Tag color.com/covid-19-treatment-or ama wac 833-273-6330 oo wax nooga sheeg astaamahaaga

Tallaabada 2-aad

Ku soo biir wicitaanka muuqaaalka ama taleefoonka

Tallaabada 3-aad

Haddii lagu qoro daawada ka hortaga fayraska (antiviral), ka qaado farmashiyahaaga maxalliga ah ama guriga halagugu keeno

Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka, fadlan booq bogga barnaamijka Maamulka Caafimaadka Oregon ee halkan:

govstatus.egov.com/or-oha-covid-19-treatments

Qorshaha Caafimaadka Oregon (Oregon Health Plan, OHP)

Dadku waxay ku heli karaan daawaynta qiimo yar ama qiimo la'aan. **Laga bilaabo Luulyo 1-deeda, 2022, dad badan oo qaangaar ah ayaa hadda u-qalma dheefaha iyo adeegyada kale, iyada oo aan loo eegayn xaaladooda sharciga socdaal.**

Waxaad booqan kartaa mareegta [Healthier Oregon](#) si aad wax badan uga ogaato ama aad u aragto [Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo \(FAQ\) ee Healthier Oregon](#).

Waxaad sidoo kale booqan kartaa [bogga mareegta Qorshaha Caafimaadka Oregon \(Oregon Health Plan, OHP\)](#) si aad u hesho macluumaadka ku saabsan u-qalmitaanka iyo sida loo codsado. Diiwaangelintu had iyo jeer way furan tahay oo Medicare iyo qorshooyinka caymiska caafimaadka gaarka ah waxay leeyihiin diiwaangelin furan inta lagu jiro deyrta. Haddii aadan hubin in OHP ay kugu habboon tahay, waxaad booqan kartaa OregonHealthCare.gov si ay kaaga caawiyaan helida codsiga sida ugu fiican idiinku shaqaynaayo adiga iyo qoyskaaga.



Bebtelovimab hadda lagagama oggolo isticmaalka degdega ah gudaha Mareykanka.

Bebtelovimab hadda lagagama oggolo isticmaalka degdega ah gudaha gobol kasta ee ka mid ah Mareykanka wakhtigan sababtuna tahay lama filayo inuu baabi'iyo Omicron subvariants BQ 1 iyo BQ.1.1.

Iftiiminta Bixiyaha





Waxaa la aasaasay 1986, Caafimaadka Bulshada Halka ah (One Community Health, OCH) waa xarun caafimaadka bulshada iyo soogalootida oo aan ahayn faa'iido doon iyo federaal ahaan la aqoonsan yahay. Albaabaddooda way u furan yihiin bulshooyinka Hood River iyo degmooyinka Wasco ee Oregon, iyo degmooyinka Klickitat iyo Skamania ee Washington. Waxay siiyaan adeegyada caafimaadka dhaqanka, ilkaha iyo caafimaadka isku darsan in ka badan 20,000 bukaano. OCH waxay aaminsan tahay in fursadaha dhaqaalaha inuu yahay qayb ka ah muhiim shaqeyn loo siman yahay iyo hagaajinta caafimaadka bulshooyinka.

Oktoobar, OCH waxay qabanaysaa *Fiesta Cultural del Gorge* keeda ugu horeeyay ee sanadlaha ah. Hadafka OCH ee ah Horumarinta Caafimaadka iyo Cadaaladda Bulshadeed ee loogu talagalay Bulshada Columbia River Gorge waxay soo bandhigaysaa sahamin joogta ah ee fikradaha hal-abuurka ah iyo mashaariic si loo xayeesiiyo caafimaadka iyo sinnaanta Bulshada. Fikrada Fiesta waxay ka dhalatay rabitaan ah in la xushmeeyo bulshada Laatiinta iyo Hisbaanishka ee weyn oo muhiimka ah ee Gorge inta lagu gudajiro Bisha Dhaxalka Hisbaanishka (Hispanic Heritage Month) waxayna diiradda saareysaa aqoonsiga kartida iyo awooda bulshada Hisbaanishka maxalliga ah.

Fiesta waxay siinaysaa manaso ganacsiyada ay Hisbaanishku maxalliga ah ay layhiin si ay iib ugu soo badhigaan oo ay suuq geliyaan badeecadooda. Isugeynta toban meherad ayaa kaqaybgalay, iyadoo ay 24 meheraddo ay wax ku darsadeen tabarucaadka iyo abaalmarinada baqti-yaanasiibka (raffle). Sidoo kale waxay siiyeen manasad 15 hay'adood oo iskaashi ay la leyhiin si loo caawiyo xubnaha bulshada inay sahmiyaan ilo/kheyraat sida gaadiidka, daryeelka caruurta, iyo waxbarashada. Sanduuqyo cunto oo dhaqan ahaan u gaar ah ayey bixisay OHA. *Qoob-ka-ciyaarayaasha Chinelos-ka dhaqameed, Los Amigos de la Sierara, iyo flore de sogá (qoob-ku-ciyaarida xarkaha) ayaa aheed madadaalo loo soo bandhigay dad tiradooda lagu qiyaasay 400 oo kaqeybgaleyaal.*

UCH ujeedadeeda waxay aheed in la kordhiyo ku helitaanka tallaallada COVID-19 iyo hargabka sida leh jawi madadaalo iyo dabaaldegid ah. Tani waxay ahayd tirada ugu sareysa waligeed ee ballamadda iska imaanshaha ah iyadoo isku dar ahaan ay aheed 133 tallaallo ah COVID-19 iyo hargabka.

OCH waxay ku faaneysaa inay u adeegto bulshada Laatiinaha ee Gorge iyo ay bixiso daryeel caafimaad hal-abuurid leh, loo siman yahay, la heli karo, iyo hawgalin leh.

Xogta qoondaynta


Waa maxay qoondaynta?

Dawladda federaalku ayaa dooranayso inta daawaynta COVID-19 ee gobol kastaa helaayo. OHA ayaa markaas go'aamisa goobaha Oregon ee laga helo daawaynta iyo inta ay le'eg tahay.

OHA ayaa markaa kadib go'aaminaysa goobaha Oregon ee laga helo daawaynta iyo inta ay le'eg yihiin. **Khariiradda** waxay muujinaysaa sida Oregon loo kala soocay oo waxay siin kartaa sawir wanaagsan waxa ay yihiin degmooyinka ku yaalo gobol kasta.

Jadwalku wuxuu muujinayaa inta daawaynta ah ee OHA ay u qoondeysay goobaha ku yaalo gudaha Oregon bishii u dambaysay. **Fadlan ogsonow** in tani ay muujinayso kaliya waxa OHA u qoondaysay oo **aysan ku jirin** qaddarada ay dawladda dhexe siiso farmashiyada.

Gobollada ku yaalo Oregon (Degmooyin ahaan)



 	Gobolka 1-aad
 	Gobolka 2-aad
 	Gobolka 3-aad
 	Gobolka 5-aad
 	Gobolka 6-aad

	Gobolka 7-aad
	Gobolka 9-aad

Gobolka oo dhan (11/01/2022 – 11/30/2022)

Nooca daaweynta	Magaca daaweynta	Qaddarka la qoondeeyay
Jeermis La Derisyada Asalka ah (mAbs)	Bebtelovimab	60
	Evusheld*	432
	Wadarta mAbs	492
Ka hortagyada fayrasyada	Lagevrio (molnupiravir)	45
	Paxlovid	1,780
	Renal Paxlovid	135
	Wadarta Ka hortagyada fayrasyada	1,960

***Evusheld** waxa loo isticmaalaa in lagaga hortago caabuqa COVID-19 ee dadka leh difaaca dhexdhexaadka ah ilaa dadka difaaca jirkooda aadka uu liito xaalada caafimaadka awgeed ama aan qaadan karin tallaalka sababo caafimaad dartood.

Remdesivir waxay sidoo kale daawa u tahay caabuqa COVID-19 ee dadka waaweyn iyo bukaanada carruurta. Fadlan ogow in tan si ganacsi loo qaybiyay, OHA-na ma qoondayso daawadaan.

Dawladda federaalku waxay uga baahan tahay dhammaan gobollada inay wadaagaan macluumaadka qaarkood ee ku saabsan maamulka daaweynta. Hadda, waxay u baahan yihiin macluumaadka ku saabsan qoondaynta, qaybinta, iyo isticmaalka maalinlaha ah. Dawladda federaalka ugama baahna dawlad-goboleedyada inay ururiyaan macluumaadka ku saabsan maamulka daaweynta ee ku salaysan jinsiyadda iyo qowmiyadda, sidaas darteed, OHA ma bixin karto macluumaadkan.

Dhacdooyinka



Dhacdooyinka Soo Socda

Kulanka Dhageysiga Bulshada

Goormee: Diseembar 14, 2022

Waqtiyada: 1:00 galabnimo – 2:00 galabnimo

OHA waxay martigelin doontaa Kalfadhi Dhagaysiga Bulshada ee gaar ah Arbacada, Diseembar 14-keedii 1 duhurnimo. Agaasimaha Caafimaadka Dadweynaha Rachael Banks iyo Erica Sandovol, Agaasimaha Sinnaanta ee Qeybta Caafimaadka Dadweynaha, ayaa ku soo biiri doona si ay si toos ah ula xiriiraan bulshada. Ujeeddada kalfadhigan waa in kor loo qaado sheekooyinka iyo khibradaha bulshada. Haddii aad xiisaynayso wax wadaagis, [foomkan](#) gaaban ayaa kugu caawin doona inaad is diyaariso. Waxaan rajeyneynaa inaad nagu soo biirto!

Kalfadhiyada Dhagaysiga Bulshada waxay u furan yihiin xubnaha, hoggaamiyeyaasha, iyo iskaashatada Bulshada ee gobolka Oregon oo dhan. Kuwani waa fursado lagula xiriiro dhakhaatiirta iyo shaqaalaha OHA iyo shaqaalaha; iyadoo ay la socoto ilaha, macluumaadka, iyo cusboonaysiinta ugu dambeeya; iyo lala xiriiro iskaashatada bulshada ee kale.

[Kalandarka/Jadwalka Dhacdooyinka Dadweynaha ee Waxqabadka Banaanada \(Field Ops Public Events Calendar\)](#)

Waxqabadyada Banaanada ee OHA waxay ku dhajisaa dhacdooyinka la taageero kalandarka/jadwalka dhacdooyinka dadweynaha. Fadlan raac linki-ga/xiriirinta ku qoran cinwaanka si aad u eegto dhacdooyinka soo socda oo aqoonso dhacdada laga yaabo inaad rabto inaad booqato.

Khayraadka/Ilaaha

[Bogga Mareegta Daawaynta Bulshada ee COVID-19](#)

[Bogga Mareegta Bixiyaha Kahortagga Fayraska COVID-19](#)

[Bogga Mareegta Bixiyaha Ka-hortagga Unugyada Jeermis La Deriska COVID-19](#)

[Bogga Mareegta Healthier Oregon](#)

[Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo \(FAQ\) ee Healthier Oregon](#)

[Bogga Mareegta Qorshaha Caafimaadka Oregon \(Oregon Health Plan, OHP\)](#)

[OregonHealthCare.gov](#)

[limayl noogu soo dir: oha.therapeutics@odhsosha.oregon.gov](mailto:oha.therapeutics@odhsosha.oregon.gov)

Dowladda federaalka

[Meeleeyaha Tijaabada Lagu Daaweeyo \(Test to Treat, T2T\)](#)

[Meeleeyaha Daaweynta COVID-19](#)

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku siin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Qeybta Xiriirrada ee COVID-19 lambarka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us.

Daabacaada codsiyada: Qalabka waad kala soo degi kartaa boggan. OHA ma bixiso noocyo waraaqa. Fadlan xornimo dareen si aad u daabacdo wax kasta oo aad u baahan tahay.

Helida luqadaha: OHA waxay ka shaqaynaysaa sidii ay macluumaadka asaasiga ah ugu bixin lahayd luqado aan Ingiriis ahayn. Qayb badan oo ka mida ah qalabyada ku jira kheyraadka bulshadeena waxa laga heli karaa luuqado kala duwan. OHA waxay sidoo kale bixinaysaa ikhtiyaar ah Google™ Translate si ay kaaga caawiso akhrinta luuqadaha aan Ingiriisiga ahayn ee Ku jira websayka OHA. Google™ Translate ma tarjumi karto noocyada dukumintiyada dhamaan waxaana laga yaabaa inaysan bixin tarjumaad sax ah. Qof kasta oo ku tiirsan macluumaadka laga helo Google™ Translate isaga ayaa mas'uul ka ah wixii ka soo gaara. OHA ma samayso wax balanqaad, u xaqiijin, ama dammaanad qaad ah oo ku saabsan saxsanaanta tarjumada la bixiyay.

Su'aalaha tallaalka guud: ORCOVID@211info.org